



# Iskadiiwaangeli

# Xannaanada

## OCDSB

OCDSB waa guddiga dugsiga ee ugu weyn Bariga Ontario, oo ku leh 115 dugsi hoose Ottawa oo dhan. Canug kasta halkaan ayaa lagu soo dhawaynayaa – ayada ooaan loo eegayn diinta, luuqadda, jinsiga ama asalka.

Dugsiga barbaarinta ee OCDSB waa goob waxbarasho oo badbaado leh, daryeel leh oo loo dhan yahay halkaas oo carruurta ku bartaan inay adduunka sahamiyaan, xaliyaan mashaakilaadka oo ay saaxiibo ku yeeshaan. Waxaan bixinaa:

- ✓ **Barnaamij maalin buuxa, laba sano ah, oo si buuxda laba luuqadood baxaya** iyadoo 50% Ingiriisi wax lagu dhigo 50% na Faransiis;
- ✓ **Waxbarasho firfircoon, oo ciyaar ku salaysan** si loo helo hab madadaalo leh oo lagaga caawinayo carruurta inay waxbartaan oo wax ogaadaan;
- ✓ **Koox barayaal ah oo xannaano badan**, iyadoo fasal walba uu leeyahay macallin iyo barayaasha carruurnimada hore; iyo
- ✓ **Barnaamijyada Maalinta ee la Ballaariyey**, ee la heli karo ka hor iyo kadib dugsiga, halkaas oo ilmahaagu ka qaybqaadan karo hawlaha taageeraya waxa uu ku barto dugsiga.

## Kulamada Macluumaadka Waalidka iyo Daryeelaha

Janaayo-Febrayo 2025, dugsiga deegaankaaga waxa uu qaban doonaa kulan xog-waraysi ah halkaas oo aad wax kaga baran doonto barnaamijyada Barbaarinta, aad kula kulmi doonto shaqaalaha oo aad ka heli doonto tilmaamo waxtar leh si aad uga caawiso ilmahaaga diyaargarowga. Booqo websaytkeena si aad u hesho jadwalka kulanka.



[ocdsb.ca/kindergarten](https://ocdsb.ca/kindergarten)

# Hadda Isdiiwaangeli!

Ilmahaagu ma yahay 4 jir sanadka 2025?  
Waxa uu diyaar u yahay inuu bilaabo dugsiga  
Barbaarinta Sibtambar. Diiwaangelintu waa  
hawl fudud oo 3-tallaabo ah:

TALLAABADA  
**1**

**Ka hel dugsiga ilmahaaga** adigoo adeegsanaya  
Dugsi Helaha la iskugu yomaado.

TALLAABADA  
**2**

**Buuxi foomka diiwaangelinta onlaynka ah.**  
Kadib markaad gudbiso foomka, waxaad heli doontaa  
iimeyl wata tilmaamo dheeraad ah.

TALLAABADA  
**3**

**Soo Qaado Dokumentiyada**

Waxaad u baahan doontaa:

- Caddaynta da'da ilmahaaga.
- Caddaynta cinwaanka.

Booqo **[ocdsb.ca/register](https://ocdsb.ca/register)** si aad  
isku diiwaangaliso.


**Ma u baahan tahay in lagaa  
caawiyo isdiiwaangelinta?**

La xidhiidh kooxdayada  
oggolaanshaha:

[boundaries@ocdsb.ca](mailto:boundaries@ocdsb.ca)

613-596-8731

ama booqo dugsiga deegaankaaga.



OTTAWA-CARLETON  
DISTRICT SCHOOL BOARD

